

Housing Assistance Resources

Qaar ka mid ah xeerarka ayaa is bedelay taasoo ay ugu wacan tahay aafada COVID-19. Haddii aadan horay uga soo bixin shuruudaha ku xiran gargaarka guryaha, fadlan la xiriir hay'adaha hoos ku xusan si ay go'aan uga gaaraan in aad ka soo baxdo mid ka mid ah shuruudaha ku xiran adeegooda.

Waxa aan doonayaa in la iga caawiyo bixinta kirada

Ka codso gargaar www.ApplyMN.dhs.mn.gov. Heerka dakhliga, ka hor inta aadan codsan, waxaa la tixgelinayaa sharciga u qofku ku joogo waddanka.

Waxa aan doonayaa in la iga caawiyo in aan heshiis la gaaro mulkiilaha guriga

[Xafiiska Dhexdhexaadinta Bulshada Iyo Dib U Soo Celinta Adeegga \(Community Mediation & Restorative Services, Inc \(CMRS\)\)](#) taasoo lagaa caawinayo in aad wada hadal la bilwdo oo aad qorshe ka wada shaqeysaan. Waxa aan kaa caawin karnaa in aan kuu sheegno fursadaha aad heysato iyo meesha aad caawinaad ka heli karto. Iimeyl referrals@CMRSmn.org ama soo wac 763-561-0173. Ku dhaaf magacaaga, telefoon lambarkaaga, iyo fahfaahin kooban oo ku saabsan xaaladaada. Shaqaalaha CMRS ayaa kula soo xiriiraya.

[Xarunta Xal gaarista Bulshada \(Conflict Resolution Center\)](#) waxa ay bixiyaan adeegga dhexdhexaadinta oo lacag la'aan ah si ay uga caawiyaan kireystayaasha iyo mulkiilayaasha in ay wada hadlaan. Soo wac 612-822-9883 ama codsigaaga ku soo dir barta internetka www.crcminnesota.org.

Waxa aan doonayaa in la iga caawiyo fahamka xuquuqda aan leeyahay kireyste ahaan

- [Adeegga Sharciyada ee Mid-Minnesota \(Mid-Minnesota Legal Aid\)](#) waxa ay talo xagga sharciga ah siinaysaa dadka dakhligoodu hooseeyo ee deggan Minneapolis. Macluumaadka iyo adeegga kirada ee ay heli karaan kireystayaasha deggan Minneapolis ee www.mylegalaid.org ama soo wac 612-334-5970.
- [HOME Line](#) waxa ay bixiyaan talo xagga sharciga ah oo qarsoodi iyo lacag la'aan ah ee dhamaan kireystayaasha deggan Minneapolis. Talo siin lacag la'aan ah oo qarsoodi ah oo xagga sharciga ah soo wac 612-728-5767 ama [su'aashaada iimeyl ugu soo dir gareenada guryaha ee HOME Line](#).
- LawHelpMN.org waxaa laga helaa macluumaad ku qoran afafka Ingiriisiga, Isbaanishka, Hmong iyo Soomaali.

Waxa aan deganahay guryaha Waaxda Maamulka Guryaha ee Minneapolis (Minneapolis Public Housing Authority (MPHA)), waxa aan heystaa fojarka guryaha, ama waxa aan doonayaa in la iga caawiyo bixinta kirada ee ku saleysan dakhligeyga

Haddii aad hesho gargaar lagaaga caawinayo bixinta kirada ee ku saleysan dakhliga ku soo gala, waa muhim in aad sheegto isbedelka ku yimid dakhligaaga markiiba. MPHA waxa ay qoysaska wargelineysaa in ay isla

markiiba soo sheegaan haddii dakhligoodu isbedelo, si loo yareeyo kirada ay bixiyaan degdegna wax looga qabto.

Si aad u soo gudbiso macluumaadka ku saabsan isbedelka, isticmaal foomka internetka ee MPHA:

- [Foomka Isbedelka Dakhliga ee Section \(Section 8 Income Change Form\)](#)
- [Foomka Isbedelka Dakhliga ee Guryaha Dadweynaha \(Public Housing Income Change Form\)](#)

Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa bogga internetka ee MPHA:

<https://MPHAOnline.org/COVID19>

Waxaan doonayaa in aan codsado lacagta dadka aan shaqeyn

Haddii aad weysay shaqadaada COVID-19 darteed, waxa aad codsan kartaa macaashka shaqo la'aanta markiiba. Mudada taleefoonka lagu jirayo oo aad u dheer darteed, barta internetka inaad ka codsato ayaa ka dhaqso badan.

[Internetka ku codso maanta](#)

Waxaa loo sameeyey jadwal habka loogu codsanayo internetka. Haddii tirada ugu dambaysa lambarkaaga bulshada (social security) ay tahay:

- 0, 1, ama 2: waxa aad codsan kartaa Isniinta inta u dhaxeysa 6 aroornimo ilaa 8da fiidnimo.
- 3, 4, ama 5: waxa aad codsan kartaa Talaadada inta u dhaxeysa 6 aroornimo ilaa 8da fiidnimo.
- 6, 7, ama 9: waxa aad codsan kartaa Arbacada inta u dhaxeysa 6 aroornimo ilaa 8da fiidnimo.

Qof kasta ayaa codsan kara Khamiista iyo Jimcaha inta u dhaxeysa 6 aroornimo ilaa 8da fiidnimo.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabto sida loo codsado, waxaad caawinaad heli kartaa Jimcaha 8da aroornimo ilaa 4:30 galabnimo adiga oo soo waca

- 651-296-3644 (Dadka degan agagaarka Magaalooyinka Mataanaha ah)
- 1-877-898-9090 (Minnesota oo dhan)
- 1-866-814-1252 (Dadka isticmaala - TTY)

Waxaan doonayaa in la iga caawiyo sidii aan ku heli lahaa Lacagta Dawladda Dhexe ee Saameynta Aafada Dhacday iyo Xareynta Canshuurta

[Diyaari oo Baraar \(Prepare + Prosper\)](#) waxa ay caawiyaan dadka dakhligoodu yar yahay iyo kuwa heerka dhexe ah si ay dhaqaale u keydsadaan iyaga oo canshuurta lacag la'aan ugu xareeya iyo adeegga kale ee maaliyadeed sida tababaridda iyo adeegyada kale. Adeegga kale ee ay qabtaan waxaa ka mid ah:

- Dadka oo ay cawiyaan iyaga oo guryahooda jooga sida xareynta canshuurta iyo lacagaha dawladda bixiso
- Caawinaad ku saabsan is diiwaangelinta kaararka bangiga ee lacagta lagu sii shubto iyo waxyaabaha kale ee la xiriira FAIR ee xisaabaha bangiyada (oo ay ka mid yihiin xisaabta furan) si ay markiiba u helaan Lacagta Gargaarka Saameynta Aafada Dhacday iyo lacagta canshuurta ee u soo noqota.

Gargaarka canshuur xareynta ama su'aalaha la xiriira soo wac 651-287-0187

ama contact@prepareandprosper.org.

Si aad xisaab u furato, [balan ka qabso barta internetka](#).

Waxa aan doonayaa in la iga caawiyo waxyaabo kale oo aan halkan lagu sheegin

United Way 211 waxa aad ka heli kartaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan guriyeynta, cuntada, bixinta kharashka biyaha iyo korontada ee Minnesota. Soo wac 2-1-1, fariin ku soo dir nawaaxiga (ZIP code) ee 898-211, ama soo booqo <https://www.211unitedway.org/> si aad fariin internetka kula hadasho qof ka tirsan shaqaalaheena oo ku caawin kara. Shaqaalaha 211 waxaa la heli karaa 24/7 kuwaas oo dhageysanaya baahidaada kuna siinaya halka ugu haboon ee aad caawinaad ka heli karto iyo barnaamijyada aad ka faa'iideysan karto.

Ma garan karo caawinaadda aan doonayo.

Haddii aad degan tahay Degmada Hennepin oo aadan garaneyn halka ugu haboon ee aad caawinaad ka heli karto, fadlan la xiriir Xarunta Adeegga Kireystayaasha Tenant Resource Center (TRC) ee 612-302-3180.